

# Macluumaad ku saabsan Isbadalka Public Charge (Dulsarka Shacabka)

## Waa maxay “Public Charge (Dulsarka Shacabku)”?

Saraakiisha laanta socdaalka ayaa adeegsada weedha Public Charge (Dulsarka Shacabka) taas oo ka dhigan dadka isku ku tiirsan taageerada dawlada. Hadii ay dawladu go’ aamiso in qofku uu yahay “Public Charge (Dulsarka Shacabka)”, waxaa loo diidi karaa inuu yimaado Maraykanka ama waxaa loo diidi karaa in daganaanshao rasmii ah lasiyo.



### Maxaa socda?

**Oktoobar 15, 2019**, waxaa dhaqan galaya isbadalada Public Charge (Dulsarka Shacabka). Isbadaladani:

- ma khuseeyaan noocyoo badan oo soo galaytiga ah
- lama dhaqan gelinayo wixii ka horeeya Oktoobar 15, 2019
- ma khuseeyaan dhamaan barnaamijyada
- ma khuseeyaan dadka dalbanaya guno ama guno ka qaata cid kale

## Public Charge (Dulsarka Shacabka) ma khuseyso noocyoo badan oo soo galaytiga ah

Kuwani waa koox **aanusaamaynayn** isbadalku:

- Qaxootiga iyo magan galyo doonta
- Dadka ka badbaaday tahiibinta dadka iyo danbiyada kale ee aadka u duran
- Dadka dalbaday badbaadin sida uu dhigayo Sharciga La Dagaalanka Tacadiga Dumarka
- Dadka dhalinyarta ah ee haysta xaalada “soo galaytiga gaarka ah ee caruurnimada”

## Public Charge (Dulsarka Shacabka) ma saamayn doono barnaamijyo kale oo badan

Barnaamijyadan **ma** saamaynayo:

- Medicaid caruurta ka yar 21 jirka iyo dumarka uurka leh (oo ay ku jiraan 60 maalmood kadib dhalmada)
- CAWEM Medicaid Degdeg ah, caymiska gaarka ah ee dumarka uurka leh
- Barnaamijka Caymisks Caafimaadka Caruurta, CHIP
- Barnaamijka Nafaqada Gaarka ah ee Dumarka, Sabiyada iyo Caruurta, WIC
- Adeegyada waxbarashada gaarka ah ee hoos yimaada Medicaid iyo kuwa ay maalgaliyaan Sharciga Shaksiyaadka Laxaadka La’, IDEA
- Sicir dhimista caymiska caafimaadka gaarka ah ee laga heley Suuqa Caymiska Caafimaadka Oregon
- Daryeelka caafimaadka ku salaysan dugsiyada
- Barnaamijka Caruurta Dhan ee Saymiska ee Oregon
- Badanaa Barnaamijkada Caafimaadka Taranka ee Oregon lagu bixiyo



# Macluumaad ku saabsan Isbadalka Public Charge (Dulsanka Shacabka)



## Degmada Multnomah, Cid Walbaaba Way Iman Kartaa.

**Sii wad helitaanka adeegyada adiga iyo qoyskaagu aad u baahan tiiin!**

Waxaanu kugu dhiiri gelinaysaa inaad sii wadato adeegyada taageerada adiga iyo qoyskaagaagu aad heshaan. Sharciga Gobolka Degmada Multnomah waxa uu ka mamnuucayaa inay dhaqan geliso shariiyada socdaalka federalka. Waxaanu sii wadi doonaa in aanu ilaalino sirtaa anaka oo raacayna tilmaamaha HIPAA.

**Hadii aad u aragto in sharcigan isbadalkisu uu ku saamayn karo, waxaad ogaataa macluumaad dheeraad ah oo la xidhiidh looyarka soo galaytiga.**

Shaqaalaha Degmada Multnomah ma bixin karto talo sharci ah, laakiin khayraadka hoose ayaa ku caawin kara.

Wixii khayraadka sharciga ah, booqo [oregonimmigrationresource.org](http://oregonimmigrationresource.org) ama [protectingimmigrantfamilies.org](http://protectingimmigrantfamilies.org)

Wixii su' aalo ah ee ku saabsan gunooyinka iyo ku biirida, la hadal Khadka Tooska ah ee Gunooyinka Shacabka ee Xarunta Sharciga Oregon iyo Adeegyada Kaalmada Sharciga ee **1-800-520-5292**.

